



3020 Children's Way, MC 5055
San Diego, CA 92123-4223

www.rchsd.org

MEMO: Xisaabinta AGB

2023

Rady Children's Hospital-San Diego's (Rady Children's) ayaa siiya caawimaad dhaqaale bukaannada u qalma sida lagu sheegay xeerka Barnaamijyada Caawimaada Dhaqaalaha. Kadib marka koontada bukaan u qalma hoos loo dhigo sabab la xiriirta Barnaamijyada Caawimaada Dhaqaalaha, bukaanka ama damiinkiisa ayaa masuul ka ah cadadka soo haray ee baaqiga bukaanka lagu leeyahay, taasoo aan ka badan karin cadadka caadiyan laga qaado (amounts generally billed, AGB) shaqsiyaadka qaata adeegga lacagta ah ee Medicare iyo daboolista caymiska caafimaadka gaarka loo leeyahay ee xaaladaha degdega ah iyo daryeelka kale ee caafimaad ahaan muhiimka ah.

Rady Children's ayaa ku xisaabiya AGB ga qaab sanadle ah ayadoo la adeegsanaayo qaabka xisaabtii sanadkii hore. Rady Children's ayaa doorta inuu ku xisaabsho hal celceliska boqolkiiba ee qarashaadka ah dhammaan adeegyada xaaladaha degdega ah daryeelka kale ee caafimaad ahaan muhiimka ah. AGB waa wadarta guud ee dhammaan lacagaha daryeelka xaalada degdega ah iyo daryeelka kale ee caafimaad ahaan muhiimka ah ee ay ogolaadeen shirkadaha caymiska ee adeegga lacagta ah ee Medicare iyo dhammaan shirkadaha caymiska gaarka loo leeyahay ee xisaabta sanad miisaaniyadeedkii hore oo loo qaybsaday hay wadarta guud ee la xiriirta qarashaadka guud ee sheegashooyinkaas sanad miisaaniyadeedkii hore.

Sanad miisaaniyadeedka 2024, AGB ga Rady Children's AGB waa 40.87%